

Isbadalada sanadka 2019 kudhacaaya Sharciyada Washington ee Mulkiilaha/Kiraystaha iyo Guri Kasaarista kiraystaha



Kiraystayaasha iyo Mulkiilayaasha dhulka: Macluumaadkaan Akhri!

Sharciyada saamaynaaya kiraystayaasha, mulkiilayaasha dhulka iyo hanaanka guri kasaarista dadka ayaa si wayn iskubadalay sanadka 2019. Isbadaladu waxay dhaqan galeen Luuliyo 28, 2019.

Maxaad baran doontaa markaad akhrido macluumaadkaan?

- Waa maxay isbadalada ugu waawayn ee sharciyada kudhacay
- Meesha aad kahelayso macluumaad dheeri ah

Muxuu sharcigu amrayaa?

Sharciyada Gobalka Washington waxaa loogu yeeraa **Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Wax laga Badalay ee Washington)**. Sharciyada ugu muhiimsan ee saamaynaaya kiraystayaasha iyo Mulkiilayaasha dhulka waxay kujiraan **Sharciga Mulkiilayaasha dhulka-Kiraystaha Deegaanka ladagan yahay** (RCW 59.18). Sharciyada Nidaamka guri kasaarista (Xanibaada Sharci Darada ah) waxaad kahelaysaa RCW 59.12. Labada sharciba si wayn ayay iskubadaleen .

➤ Kiraystayaashu waxay haystaan waqti dheeri ah (14 Maalmood) si ay iskaga baxshaan kirada.

Ilaa laga gaaraayo Luuliyo 27, 2019, hadii kiraystuhu lasoo daaho kirada (xataa hal maalin), mulkiilaha dhulka ayaa siinaaya “Ogaysiiska 3 Maalmood ee Amraaya inuu Kirada Baxsho ama Kaguuro goobta.” Hadii uusan kiraystuhu bixin karin kirada dhamaan booska muddada looqabtay ee 3 maalmood ah, mulkiilaha dhulka ayaa gudbin kara dacwada guri kasaarista ah oo kadhah ah kiraystaha. Mukiilaha dhulku ma aqbali karo inuu qaato qayb kamid ah lacagta kirada ah ama yaryaraynta qarashka.

Marka lagaaro Luuliyo 28, 2019: hadii kiraystuhu kirada ladaaho maalin, mulkiilaha dhulku waa inuu baxshaa **Ogaysiiska 14 Maalmood ee Amraaya inuu Kirada Baxsho ama**

Kaguuro goobta. Kiraystaha ayaa intaas kadib haysta 14 maalmood si uu udhiibo kirada. Kadib mudadaas, mulkiilaha dhulku wuxuu gudbin karaa dacwad guri kasaarid ah oo kadhan ah kiraystaha.

Sharciga waxaa sidoo kale kujira foomka Ogaysiiska Qasabka ah ee 14 Maalmood ee Amraaya inuu Kirada Baxsho ama Kaguuro goobta kaasoo ay qasab tahay in mulkiilayaashu adeegsadaan.

➤ **Dad badan oo kiraystayaal ah ayaa awoodi doona inay kirada iskabaxsaan ayna gurigooda joogaan.**

Waagii hore, marka dacwada guri kasaaristu bilaabato, inta badan dadka kiraystayaasha ah masii joogi karin—xataa haday awoodi kareen inay baxsaan kirada mulkiilaha dhulka dhamaantiis, qarashaadka ganaaxa dib udhaca kirada, iyo qarashaadka qareenka ee lagu yeeshay. Hadda, dad badan oo kiraystayaal ah ayaa awoodi doona inay baxsaan xili danbe lacagta kirada booska ay dagan yihiin ee lagu yeesho. Dad badan oo kiraystayaal ah ayaa awoodi doona inay kirada iskabaxsaan si ay uga fogaadaan in guriga laga saaro ayna hooy la'aan noqdaan.

Hal arin awgeed, garsoorayaashu waxay hadda fursado badan uhaystaan inay abuuraan qorshaha bixinta qarashka kaasoo ay wada aqbali karaan dadka kiraystayaasha ah iyo mulkiilayaasha dhulka. Dad badan oo kiraystayaal ah ayaa awoodi doona inay lacagta kudhiibaan qorshaha lacag bixinta, ayna waqti badan uhelaan inay caawimaad karaadsadaan deeq bixiyaasha iyo wakaaladaha kale si ay uga baxsaan kirada mulkiilaha dhulka (xataa kiraystayaasha goobta kubaxsho qaab bille ah).

➤ **Kiraystayaasha booska loogama saari karo inay bixin waayeen qarashaadka aan ahayn “kirada”.**

Waagii hore, mulkiilayaasha dhulku waxay kiraystayaasha kaqaadi kareen qarashaadka kirada waxayna kusoo rogi jireen noocyo kale oo qarashaadka “aan kirada ahayn” -- qarashaad ganaaxa lasoo daahida kirada, biilalka dayactirka khilaafka, noocyada kale ee ganaaxyada halka mar ah. Hadda, mulkiilayaasha dhulku waa inay marka koobaad qarashaadka kirada kiraystaha ku bixiyaan kirada (iyo qaar kamid ah qarashaadka joogtada ah, ee alaabaha bishiiba labaxsho).

Mulkiilayaasha dhulku waxay wali iskudayi karaan inay guriga kasaaraan kiraystaha haday lasoo daahaan bixinta kirada (kadib markay siiyaan Ogaysiiska 14 Maalmood) laakiin iskuma dayi karaan inay kirayste guria uga saaraan sabab laxariirta inay lasoo daaheen “lacagaha aan kirada ahayn” iyo kuwa ganaaxyada ah (Mulkiilayaasha dhulku waxay wali furi karaan dacwad si ay qarashaadkaan uga qaadaan kiraystaha xili danbe, tusaale ahaan, inay kiis geeyaan Maxkamada Dacwadaha Yaryar).

➤ **Xadiyo cusub oo loosameeyay qarashaadka qareenada.**

Waagii hore, xataa hadii kiraystuhu kuguul daraysto kiiska guri kasaarista cilad xagisa ah awgeed (sabab laxariirta inuu jawaab soo bixin waayay xiligii larabay ama sabab laxariirta inuusan awoodin inuu dacwada yimaado), mulkilaha dhulku wali wuu awoodi karay inuu lacagta qareenka kaqaado kiraystaha asagoo raacaaya xukunka guri kasaarista.

Hadda, qareenadu maqaadan karaan qarashka xukunka aan kiraystuhu kaqaybgalin (sida marka aan kiraystuhu kajawaabi karin xiligii larabay ama uu guriga kaguuro).

Qarashaadka qareenada waxaa sidoo kale laxadidayaa hadii kiraystuhaha lagu leeyahay wax kayar 2 bilood kiradood ama wax kayar \$1200.

➤ **Mulkiilayaal badan oo gurto leh ayaa dukumiintiga xukunka guri kasaarista siinaaya kiraystayaasha ayagoo albaabka usoo dhigaaya hadii kale boostada ugu diraaya.**

Mulkiilaha dhulku waa inuu wali adeegsadaa “muujinta masuuliyada arinta” asagoo si toos ah waraaqaha amarka guri kasaarista ugu gaynaaya kiraystaha si shaqsi ah asagoo gurigiisa jooga.

Waagii hore, hadii aan talaabadaas shaqayn, mulkiilaha waxaa qasab ku ahayd inuu ogolaansho kasoo qaato garsoore dukumiintiga amarka guri kasaarista kadibna albaabka ugu dhajinaaya boostadana ugu diraaya kiraystaha.

Hadda, kadib marka uu iskudayo 3 jeer oo kaladuwan (muddo 2 Maalmood ah) inuu kiraystaha si toos ah ugu geeyo, mulkiilayaasha qaarkood waxaa ufurnaan karta inay soo dhajiyaan boostadana ugu diraan waraaqaha amarka guri kasaarista ayagoon fasax kasoo qaadan garsoore.

➤ **Ogaysiiska 60 maalmood ee qasab ah in labaxsho inta badan marka kirooyinka lakordhiyo.**

Waagii hore, mulkiilaha dhulku wuxuu bixin karay ogaysiis qoran 30 maalmood kahor si uu ukordhiyo kirada bil kasta labaxsho. Hadda, mulkiilayaasha dhulku waa inay kusiiyaan ugu yaraan ogaysiis soconaya 60 maalmood (inta badan markasta).

Sidoo kale, mulkiilayaasha dhulku makordhin karaan lacagtaada kirada ayadoo uu socdo muddada heshiiska kirada (ilaa inaad kunooshahay maahee guryaha dhaqaale ahaan lagaa kaabo kuwaasoo kirada aad dhiibto ay isbadasho marka dakhliga kusoo gala uu isbadalo).

➤ **Ogaysiiska 120 maalmood ee ay loo baahan yahay kahor intaan dayactiro waaayn guryaha lagu samayn.**

Waagii hore, naqshadeeyaha doonaaya inuu badalo adeegsiga guri ama inuu si buuxda udayactiro guriga waxay ahayd inuu siiyo dhamaan dadka kirada bilaha ah baxsha ogaysiis dhan 20 maalmood kahor intuuusan baabi'in heshiiskooda kirada.

Hadda, mulkiilayaasha dhulku waa inay siiyaan kiraystayaasha Ogaysiiska 120 Maalmood kahor intaysan isbadalo waawayn kusamayn adeegsiga dhismaha guriga ama aysan si buuxda dayactir ugu samayn (ayna ugu sahlaan in qofkasta guriga kabaxo).



Digniin!

Sharciyada qabanaaya mulkiilayaasha dhulka iyo dadka kiraystayaasha ah ayaa noqon kara kuwo dhib badan, gaar ahaana isla marka isbadalada noocaan ah ay yimaadaan.

Macluumaadkaan wuxuu kaliya bixinayaa faahfaahinta kooban ee aasaasiga ah. Mulkiilayaasha dhulka iyo kiraystayaashu waa inay labaduba ogaadaan inay jiraan himilooyinka qaar oo muhiim ah oo sharciyadaas kadoonayaan!

Waxaad faahfaahin dheeri ah kaheli kartaa barta WashingtonLawHelp.org.

Daabacaadaan waxay bixinaysaa macluumaad guud oo laxariira xaquuqahaaga iyo waajibadka kusaaran. Maaha daliil talo dhanka sharciga ah oo gaar ah. Macluumaadku waa mid cusub oo ladaabacay bishii Luuliyo 2019.

© 2019 Northwest Justice Project — 1-888-201-1014.

(Fasax ayaa loosiiyay inay koobi kala baxaan ayna qaybiyaan Alliance for Equal Justice (Ururka isbahaysiga Sinaanta Cadaalada) iyo shaqsiyaad sababo kabaxsan ganacsi oo kaliya.)